

## SOMALIA

## XAQIIQOYINKA IYO TIROOYINKA

JANAAYO - JUUNYO 2024



## HAGAAJINTA XAALADAHА NOLOLEED IYO LA MACAAMILKA MAXAABIISTA

- ICRC-da ayaa **23** booqasho ku tagtay **12** xabsi si ay u qiimeyso una hagaajiso xaaladaha nololeed iyo habka loola macaamilo **3,351** maxaabiis ah. **468** maxbuus ayaa la kormeeray si gaar gaar ah.
- **4** farriimaha akhbaarta qoyska ah ayaa loo diray qoysaska maxaabiista iyada oo la adeegsanayo taleefan. **19** farriimo afka ah ayaa laga soo ururiyay maxaabiista iyada oo loo gudbiyay qoysaskooda. **30** Farriimaha Laamqeyrta Cas ah ayey isdhaafsadeen maxaabiista iyo qoysaskooda. **18** Qof oo ajnabi ah ayaa lagu wargaliyay wakiillada qunsulkooda ama UNHCR.
- Inta lagu jiray bisha Ramadaan, **5,737** maxaabiis ah oo ku jira **11** xabsi ayaa helay saliid, misir, caano, timir, sokor, yaanyo shiishiid, iyo hilib ari si ay ugu dhammeystiraan afurkooda.
- **3,310** maxbuus ayaa la gaarsiiyay agabka shakhsiyadeed ee aasaasiga ah sida saliyaal, agabka madadaallada, joodariyaal, -kaneeco iyo bustayaal.
- **95** maxaabiis ah oo qaba nafa xumo aad u daran iyo mid dhexdhexaad ah ayaa la taageeray.
- Xarumo caafimaad oo ku yaala **3** xabsi ayaa lagu taageeray deeq isugu jirta dawooyinka asaasiga ah iyo agabka dhaawaca lagu dhayo. Qalabka caafimaadka aasaasiga ah ayaa waxaa ka faa'iideysan doona **1,259** maxbuus.



## ILAALINTA DADKA RAYIDKA AH

- **67** ah dhacdooyinka colaadaha la xiriira ayey ICRC-du ka diiwaangalisay bulshooyinka ay dhibtu saameysa.. Arintaa oo ay ka dhalatay:
  - Walaac ay soo gudbiyeen **73** qof ayaa lala soo qaaday kuwa hubka sita si loo raadiyo magdhow loogana hortagayo waxa mustaqbalka dhici kara.
  - **87** qof ayaa helay kaalmo lacageed si looga caawiyo ka soo kabashada dhibaatooyinka ka dhasha colaadaha iyo rabshadaha.
  - **31** qof ayaa loo diray hey'ado kale oo aan saaxiib nahay si ay u helaan adeegyada ay u baahanyihiin.



### ILAALINTA XIRIIRKA QOYSKA

- Iyada oo la kaashanayo Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS), **30,432** oo ah farriimaha Bisha Cas ayaa la isdhaafsaday, iyo **93,194** oo ah wicitaano taleefan oo bilaash ah ayaa loo sameeyay qoysaska kala lumay.
- SRCS ayaa soo heshay **257** qof oo la la'aa oo ay xubnaha qoysaskoodu raadinayeen. Isugeyn, **26** xero qaxooti oo ku yaala Soomaaliya ayaa la siiyay adeegyada Ilaalinta Xiriirka Qoyska.



### KOR U QAADISTA SHARCIGA CAALAMIGA AH EE BINI'AADAMNIMADA (IHL)

- **260** oo ah xubno ka tirsan ciidamada ammaanka ayaa la baray sharciga caalamiga ah ee bini'aadamnimada iyo hagaajinta ilaalinta dadka rayidka ah.
- **257** qof, oo ay ku jiraan shaqaale ka socda **5** xarun caafimaad ayaa helay xog ku saabsan Daryeelka Caafimaadka oo Halis ku jira si loo dhiirgaliyo ixtiraamka shaqaalaha caafimaadka, xarumaha, iyo gaadiidka.
- **31** arday ah ayaa looga warbixiyay ICRC-da iyo sharciga caalamiga ah ee bini'aadamnimada halka **24** arday oo ka kala socda **3** Jaamacadood ay ka qeyb qaateen Tartan Goboleedka Qormooyinka IHL.



### HORUMARINTA HELITAANKA DARYEELKA CAAFIMAADKA

- **138,272** bukaan ayaa helay Daryeelka caafimaadka aasaasiga ah iyaga oo ka helay **21** xarun caafimaad oo ka tirsan SRCS.
- **6,532** bukaan ayaa la daryeelay iyada oo la adeegsanayo Barnaamijka Daweynta Bukaan socodka **14** xarun caafimaad oo ka tirsan SRCS. **15,417** caruur ah oo ay da'doodu ka yartahay **5** sano iyo **5,895** oo ah haween uur leh ayaa helay plumpysup, oo ah cunto nafaqo leh, iyo boorash si ay gacan uga geystaan ka hortagga nafaqoxumada.
- **3,268** baaritaano ah ayaa laga sameeyay **3** isbitaal oo ay taageerto ICRC.
- **1,172** caruur ah oo ka yar 5ta sano oo qabay nafaqo xumo aad u daran ayaa isbitaal la seexiyay iyada oo lagu daweyay Xarunta Dajinta xaaladda bukaannada ee Kismaayo.
- **174** bukaan oo laga keenay xarumaha caafimaadka ee SRCS ayaa loo gudbiyay isbitaal kala duwan si ay u helaan daryeel gaar ah iyada oo lacagta gaadiidkana laga bixiyay.
- **10** isbitaal ayaa ICRC ka helay deeq/taageero; iyada oo sidoo kale la gaarsiiyay **3** ah agabka lagu daweyo dhaawacyada xabadaha oo dhammeystiran oo ay ku jiraan agabka dhaawaca lagu dhayo.
- **8** xirfadleyaal caafimaad ah oo ka kala socday isbitaal ku kala yaala gobollada colaadda u nugul ee dalka, ayaa ka qeyb galay Koorsada Dhaawaca Qolka Deg-degga ah (ERTC) oo ay qabatay ICRC, iyadoo **3** sarkaal dhinaca caafimaadka oo ka tirsan ICRC ay kormeer ahaan uga qeyb galeen. Arintan ayaa waxaa lala kaashaday isbitaal Madina.



### KA JAWAABIDDA SHUBAN BIYOODKA DARAN

- **205,101** qof ayaa ka qeybgalay kulamo caafimaadka kor loogu qaadayo si looga hortago shuban biyoodka daran.
- **5,165** xaalado shuban biyoodka daran ah ayaa la aqoonsaday iyada oo loo gudbiyay xarumo SRCS ka tirsan oo kala duwan.



### DHAQAN CELINTA JIRKA

- **3,581** qof ayaa helay adeegyada dhaqan celinta jirka: **1,456** oo Muqdisho ah, **1,075** Hargeysa ah, iyo **1,050** Gaalkacyo ah.
- dhammaan xarumaha dhaqan celinta jirku waxa ay fuliyeen **20,761** kulamo fiiso-tarbiyo ah. Intaa waxaa dheer, **281** qeybaha jirka oo macmal ah, **988** qalabka xubnaha jirka kaalmeeya ah, **752** qalabka socodka kaalmeeya iyo biraha naafada, **135** kuraasta naafada iyo aaladaha lagu toosiyo qaab-dhismeedka jirka, iyo **16** oo ah agabka howlaha nolol-maalmeedka (ADL) ayaa la qeybiyay.



### GARGAARKA DEG-DEGGA AH IYO DARYEELKA ISBITAALKA KA HOR

- **3,730** oo ah bukaano qaba dhaawacyo hub ah ayaa la daweyay, kuwaas oo qaar ka mid ah ay isbitaal u qaadeen kooxaha aambalaasta ee SRCS.
- **175** qof ayaa qaatay Koorsooyinka Tababarka Gargaarka Deg-degga ah ee Bulshada (CFAT) Soomaliya.
- **2,202** oo ah ka qeybgaleyaal dheeri ah ayaa xaadiray koorsooyin Gargaarka Deg-degga ah oo ay bixisay Bisha Cas (SRCS) arintan oo ka mid ah barnaamijkooda tababarka ee joogtada ah.



## GARGAARKA DEG-DEGGA AH IYO SOO CELINTA HAB NOLOLEEDKA

- **32,028** qof oo ay colaaddu saameysay ayaa lagu caawiyay taageero lacageed. Intaa waxaa dheer, **2,478** qof ayaa helay taageero lacageed arintan oo qeyb ka ah ka jawaab celinteena fatahaadaha.
- **5,496** beeraley ah oo ku dhaqan jiinka wabiga ayaa la gaarsiiyay deeq lacageed si loogu caawiyo in ay dib u soo celiyaan hab nololeedkooda.
- **250** xubnood oo ka tirsan iskaashatooyinka beeraleyda ayaa helay walxo ku saabsan beeraha, oo ay ku jiraan abuurka, bacrimiye, sunta cayayaanka, carro gedis, iyo tababarro ku aadan wax soo saarka abuurka mar walba la beerto.
- **91** oo ah shaqaalaha caafimaadka xoolaha ee bulshada ayaa ka qeyb qaatay korsooyin tababarro xusuusin ah iyaga oo sidoo kalena helay agabka bilowga ah ee caafimaadka xoolaha ama lacago shuruudeysan.
- **594** oo ah dumar hogaamiya qoysas ayaa lagu caawiyay lacago loogu talagalay in lagu taageero ganacsiyadooda yar yar.
- **153** ah dhalinyaro ka soo jeeda qoysas barakacayaal tag daran ah ayaa qeyb ka ahaa tababarro xirfadeed.
- **16,003** ah caruur iyo **6,573** ah dumar caruurtooda nuujinaya ayaa helay taageero dhinaca nafaqada ah.
- **125** ah caruurta ku jira xarumaha da'yarta lagu hayo ayaa helay alaabta guryaha, oo ay ku jiraan teendhooyin, saliyaal iyo maro-kaneeco.





## FUDUDEYNTA HELITAANKA BIYO NADIIF AH, NADAAFADDA IYO ADEEGYADA KAABAYAASHA CAAFIMAADKA/XABSIYADA

- **33,846** qof ayaa biyo nadiif ah ka helay **9** nidaamyada biyaha ah.
- **23,100** qof ayaa helay agabka nadaafadda oo ay ku jiraan saabuun, kaniiniga biyaha jirgaano iyo macluumaad ku saabsan ka hortagga iyada oo laga jawaabayo cudurrada ba'an ee biyaha ka dhasha iyo koleeraha ka dillaacay in ka badan **6** goobood oo Soomaaliya oo dhan ah.
- **4,142** maxbuus oo ku jira **11** xabsi ayaa helay agabka nadaafadda. Howlaha laga qabtay xabsiyadan (PoDs) ayaa sidoo kale waxaa ka mid ahaa dayactirka nidaamka biyaha iyo biyo dhaamin deg-deg ah.
- Howlo dayactir ah ayaa laga fuliyay Isbitaalka Guud ee Kismaayo oo ay taageerto ICRC si hagaajiyi nidaamka biyaha iyo korontada.
- **26** Shaqaalaha ceelasha Wakaaladda Biyaha Puntland (PWDA) ayaa tababar loo sameeyay iyada oo sidoo kalena la siiyay qalab ay howl-maalmeedkooda dayactirka ceelasha ku qabsadaan.





## U-XISSAB CELINTA DADKA AY DHIBAATADU GAARTAY

- **10,489** wicitaano ah ayaa laga helay bulshada ay dhibaataadu gaartay lagana shaqeeyay iyada oo la adeegsanayo lambarka bilaaska ah ee (373).
- **7,306** ka mid ah jawaab celinta ayaa la xiriirtay barnaamijyada taageerada hab-nololeedka iyada oo inta ugu badan laga helay gobollada Banaadir, Baay, Shabeelada Hoose & Shabeellada Dhexe.
- **3,181** jawaab celinta ayaa la xiriirtay barnaamijka Daryeelka Caafimaadka Aasaasiga ah iyada oo inta ugu badan laga helay gobollada Baay, Bakool, Shabeelada Hoose & Shabeellada Dhexe.
- **2** wicitaano ah oo lagu codsanayo taageero dayactir ceel iyo hooy ah ayaa laga helay Burtinle & Jowhar sida ay u kala horreeyaan.
- **61%** ka mid ah codsiyada ayaa ahaa kuwo lagu rabo kaalmo cusub ama dheeri ah oo dhinaca hab-nololeedka ah halka **6%** ka mid ahna ay daba socdeen kaalmo aanan la helin on non-received livelihoods assistance/wicitaano hubin ah, kaalmo daawo ah/cabasho ku saabsan daawo yari ka jirta xarumaha caafimaadka; **33%** ka mid ah ayaa muujiyay mahadcelintooda ku aadan kaalmada ay heleen.
- Kormeerka kaalmada ka hor oo loo sameeyay **6,869** ka faa'iideystayaal ah ayaa loo diiwaan galiyay barnaamijyada taageerada kaalmada lacageed iyo hab-nololeedka oo laga sameeyay gobollo kala duwan oo Soomaaliya ah ayada oo la dhaqangaliyay iyada oo la sdeegsanayo Xarunta wicitaanka iyada oo **98%** (**6,407**) ka mid ahna la xaqiijiyay.
- **4,156** ka faa'iideystayaal deeq lacageed oo ujeedo badan ah, barnaamijyo dakhli abuur ah, deeq lacageed iyo deeq loogu talagalay soo kabashada beeraha ayaa lala xiriiray wajiga kormeerka kaalmada ka dib si loo hubiyo in ay kaalmada heleen iyada oo **100%** (**4,111**) la xaqiijiyay in ay heleen.
- **112** oo ah ka faa'iideystayaasha daryeelka caafimaadka aasaasiga ah (PHC) ee adeegyada SRCS ayaa la qiimeeyay si loo xaqiijiyo hirgalinta gudbinta bukaanada, iyada oo **96%** ka mid ah ay xaqiijiyeen in la gudbiyay lacagta gaadiidkana laga bixiyay.



ICRC Somalia Delegation  
Ngecha Road off Lower Kabete Road  
P.O.Box 73226-00200 Nairobi-Kenya  
T + 254 0709 132 000  
SOK-Nairobi@icrc.org

Xafiisyadha ICRCda ee Mogadishu, Kismayo, Garowe, Baidoa,  
Jowhar, Dhusamareeb and Hargeisa.  
www.icrc.org  
All photos: ICRC  
© ICRC, Agoosto 2024



ICRC

facebook.com/ICRCAfrica  
twitter.com/ICRC\_Africa  
instagram.com/icrc\_somalia  
blogs.icrc.org/Somalia